



# Su'aalaha Inta Badan La iska Waydiyo Dardaaranka

Common Questions About Wills

## Waa maxay dardaaran?

Dardaaranku waa qoraal aad qortay oo aad ku sheegaysid waxa hantidaada laga yeelayo marka aad geeriyyootid. Dadka aad hantida u dardaarmaysid waxaa la yiraahdaa dhaxlayaasha. Dardaaranqaaga waxaad ku daraysaa qof aad doonaysid inuu hantidaada sida aad doonaysid u maamulo ama u qaybiyo. Qofkaa waxaa loogu yeeraa qofkii adiga wakiilka kaa ah, hadii aadan adigu qof magacaabin Maxkamadda Dhaxalka ayaa qof kuu magacaabaysa. Qofka wakiilka kaa ah mararka qaarkood waxaa loogu yeeraa hawl fuliye.

## Maxaa dhacaya hadaan geeriyyodo anigoon dardaaran qorin.

Hadii aad geeriyyootid adigoon dardaaran qorin, waxa jira sharci gobolka u yaala oo qeexaya sida hantidaada loo qaybinayo. Qoyskaaga ayaa loo qaybinayaan iyadoo la raacayo sida sharciga gobolku dhigayo.

Dadka qaarkii ayaa waxay ka walwalaan in gobolku hantidooda qaato hadii ay geeriyyodaan iyagoon dardaaran qorin. Inay arrintani dhacdaa aad ayay u yar tahay. Gobolku wuxuu hantidaada qaadan karaa keliya hadii:

- Aad geeriyyootid iyadoo hantida magacaaga keliya ahi ku qoran yahay, iyo
- Hadii **uuna jirin** qof nool oo aad dhalasho wadaagtaan ama dad aad soo korsateen oo sidaa aad qaraabo ku noqoteen



## Goorma Ayaan Dardaaran u baahnahay?

Dardaaran ayaad u baahan tahay hadii aad doonaysid:

- Inaad hantidaada uga tagtid qof aad saaxiib tiihiin ama aad sadaqaysatid intii aad qoyskaaga uga tegi lahayd
- Inaad hantidaada uga tagtid dad uuna sharciga gobolku waxba hantidaada ka siinayn marka la qaybiyo. Waxaa jira [a table of MN heirship](#)

- [\(jadwalka dhaxalka ee MN\)](#) Kaa soo laga helayo barta internetka ee xeer ilaaliyaha guud ee gobolka MN jadwalkani wuxuu tusayaa sida sharciga gobolku dhaxalka u qaybiyay.
- Aad doonaysid inaad alaaboojin cayiman siisid dad gaar ah
- Inaad qof dhaxalkaaga wax kule marka sharciga gobolka la fiiriyo aad qadisid
- Inaad si aan sinayn hantidaada ugu qaybisid dadka dhaxalkaaga leh
- Inaad ilmo aan qaan gaadh ahayn u magacawdid qofka mas'uulka ka noqonaya
- inaad ka hor tagtid in qoyskaagu dhexdiisu hantida ku dagaalamaan

## **Goorma ayaanan dardaaran u baahnayn?**

Dardaaran uma baahnid hadii:

- Aadan haysan hanti dhul iyo guryo ah oo magacaaga keliya ahi ku qoran yahay. Oo hantidaada dhulka iyo guryaha ay dad kale kugula qoran yihiin kulana leeyahiin isla markaana ay iyagu xaq u leeyahiin la wareegida hantida hadii aad adigu geeriyoootid ama kolba qofka nooli uu hantida u hadhayo.
- Aad haysatid hanti dhul iyo guryo ah oo magacaga keliya ahi ku qoran yahay, laakiin aad magacawday hal qof ama ka badan oo hantidaada lagu wareejinayo hadii aad geeriyoootid kuwaas oo aad ka diiwaangashan xafiiska hantida ma guurtada ah ee degmada. Akhri xogtan kooban halkan ka gal [Wareejinta Hantida Geerida Ka Dib.](#)
- Aad leedahay qof hadii aad geeriyoootid ku dhaxlaya oo ku qoran warqadaada mulkiyadda oo la wareegaya hantidaada sida,xisaabta bangiga kuu taala,iyo lacagta suuqa ganacsiga kuugu jirta.
- Aadan lahayn wax dhul ah ama guryo ah oo magacaaga keliya ahi ku qoran yahay isla markaana warqadda mulkiyadda ee hantidaaduna uuna ku qoray( qof ku dhaxlayaa) qiimaha hantidaaduna tahay \$75,000 ama ka yar tahay. Haday arrintu sidaas tahay qoyskaagu waxay u baahan yihiin in markhaatiyo cadaynaya cida ay yihiin ay warqad u qoraan ka dibna ay nootaayo ku dhuftaan intaa ka dib iyagoon maxkamadda dhaxalka tegin ayay magacoodu ku soo wareejin karaa warqadda mulkiyadda.



- Aad doonaysid in hantidaada loogu qaybiyo qoyskaaga sida sharciga gobolku dhigayo (Akhri macluumaadka kor ku qoran). Tusaale, hadii hooyo ninkeedii dhintay oo laba caruur ah haystaa ay geeriyooto sharciga gobolku labada ilmood si is le'eg ayuu ugu qaybinayaa hantida. Haday marka hooyadu doonayso in sidaa caruurta wax loogu qaybiyo uma baahna inay dardaaran qorto, laakiin waxaa loo baahanayaa in maxkamadda dhaxalku ay soo dhex gasho.

### **Hadii aan anigu aad u jirado oo aan hawsha qaban kari waayo miyuu qofka aan wakiishay hawlaha aan doonayo qaban karaa?**

Maya. ma qaban karo dardaarkanaga wuxuu dhaqan gelayaal keliya markaad geeriyoottid **ka dib**. Hadii aad doonaysid in qof wakiilka kaa ahi uu hawlahaaga qabto, hadii aad naafo noqotid ama qof aan arrintiisa maamuli Karin waa inaad siisid awood sharci ah oo qoraal ah oo uu ku maamuli karo dhaqaalahaaga isla markaana uu xaaladaada caafimaad go'aan kuugu gaari karo.

Akhri xogtan kooban, [Dardaaranka Caafimaadka](#) iyo [Wakiil Ka Nogosho Si Sharci Ah](#).

### **Maxaa dhacaya hadii hantida keliya ee aan leeyahay ayna lacag badan goynayn laakiin ay qiimo taariikheed ii leedahay**

Waxaad u baahan tahay dardaaran. Waxaad qortaa dardaaran iska fudud waxaanad ku lifaaqdaa liisto ay ku qoran yihiin hantida aad leedahay iyo cidda aad doonaysid in la siiyo. Markasta oo hantidaada wax iska badalaan liistadana waxbaad ka badalaysaa, xataa hadii aadan dardaarkan waxba ka badalayn.

Waxyaalaha ay ka midka yihiin alaabooinka sida, alaabooinka la isku qurxiyo... sawirada qoyska, warqadaha shakhsiga ah ee aad adigu qoratay, qalabka wax lagu hagaajiyo, alaabadda guriga waxay yeelan karaan qiimo taariikheed ama qiimo kale, laakiin ma wataan wax qoraal oo tusinaya cidda iska leh.

Hadii aadan shayyaddan ku darin dardaarkan, waxaa laga yaabaa inuu qaato qof aadan jeclayn inuu qaato, ama waxaa laga yaabaa in dadka dhaxalkaaga lihi ay isku khilaafaan qofka qaadanaya. Mararka qaarkood hantida qiimo taariikheedka lihi waxay abuurtaa khilaafka ugu wayn ee xubnaha qoyska soo kala dhex gala.



Dardaaran uma baahnid hadii aad hantidaada bixisid inta aadan geeriyoona ka hor.

### **Siddee ayaan ku hubin karaa in dardaarankayga la raaco?**

Qofka aad wakiilatay wuxuu ilaalinayaan hantidaada inta ay biilkaaga bixinayaan. Ka dib marka biilasha laga bixiyo lacagtaada, waxay hantidaada u qaybinayaan dadka dhaxalkaaga leh waxayna ugu qaybinayaan sidii uu dardaarankaagu ah. Sidoo kale waxay hubinayaan sidii loo heli lahaa lacagta caymiskii nolosha eed ku jirtay iyo lacagtaadii hawlgabka la siinayay. Wakiilnimadu waa shaqo aad muhiim u ah. Hubi in qofka aad doonaysid inaad wakiilataa inuu rabo inuu hawshan qabto iyo in kale.

Hadii qofka aad wakiilatay u baahdo amar maxkamadeed uu ku badalo warqadii mulkiyadda ee hantidaada ama dardaaranka khilaaf ka yimaado waxay dacwo dardaarankaaga ku saabsan ka furayaan maxkamadda dhaxalka.



### **Waa Maxay Shaqada Maxkamadda Dhaxalku?**

Maxkamadda dhaxalku waxay go'aamisa inuu dardaaranku mid sax ah yahay iyo in kale, waxaa kale ooy kala xukuntaa muranka ka dhasha dardaaranada, sidoo kale waxay bixisaa amar lagu kala wareejinayo warqadaha mulkiyadda sida dhulka ,guryaha, gawaarida iyo hantida kale ee warqadda mulkiyada ah leh. Hadii aadan dardaarankaaga ku darin qof wakiil kaa ah maxkamadda ayaa wakiil kuu magacaabaysa. Hadii hantidaada qiimaheedu ka hooseeyo \$75,000 waxaa laga yaabaa in dardaarankaagu aanu u baahnayn inuu soo maro maxkamadda dhaxalka. Akhri xogtan kooban,

[Su'aalaha Ku Saabsan Dhaxalka](#).

### **Ma waxaan u baahnahay foom khaas ah ama qareen si'aan dardaarankayga u qorto?**

Waxaad foom iska fudud oo kuwa dardaaranka lagu qora ah ka heli kartaa qaar ka mid ah dukaamada gada qalabka xafiisyada,barta internetka ama mid laga soo qaatay buuga laga barto sida qofku naftiisa u caawiyo(self-help book). Waxaa **laga yaabaa** in foomamkani kuu shaqeeyaan laakiin la tasho qareen si aad u hubisid in foomamkani yihii kuwo ku haboon xaaladaada isla markaana waafaqsan sharciga gobolka. Si dardaarankaagu mid sharci ah u noqdo waxaa jira sharciyo lagaa doonayo inaad raacdidi.

### **Dardaarankaygu miyuu u baahan yahay in nootaayo loo sameeyo?**

Maya, gobolka Minnesota uma baahnid in dardaarankaaga nootaayo loo sameeyo si'uu sharci u noqdo. Laakiin Minnesota waxay kaa doonaysaa in dardaarankaagu yahay "mid cadayn-weheliso." Hadii aad doonaysid inuu dardaarankaagu noqdo mid cadayni weheliso waxaad u baahan tahay inaad soo nootaayaysid. Dardaaranka

cadayntu wehelisaa wuxuu kaa cawinayaan inaad cadaysid in dardaarankaagu uu mid sax ah yahay hadii maxkamad la isla aado.

## **Si aad Dardaarankaaga Uga Dhigtid Mid-Cadayni Weheliso**

Si aad dardaarankaaga uga dhigtid mid cadayni weheliso adiga iyo qofka markhaatiga kuu ahiba waa inaad tagtaan meel nootaayo leh ka dibna saxiixdaan warqadda markhaatiga ee cadaynaysa in adiga iyo markhaatigaaguba aad ogтииин inaad saxiixaysaan dardaaran. Waa inaad dhamaantiin soo qaadataan aqoonsiyadiina (IDs).

Ugu yaraan waxaad u baahan tahay 2 markhaati. Waana Khasab inay yihii:

- Waa in da'doodu ka wayn tahay 18 sano
- Waa in aan la soo khasbin oo ay iskood u saxiixayaan
- Inay yihii dad miyir qaba

Wakhtigii la doono ayaa dardaaranka laga dhigi karaa mid cadayni-weheliso.

## **Halkeen Ku xafidaa dardaarankayga?**

Dardaaranku uma baahna in maxkamad laga diiwaangeliyo marka la qoro ka dib, laakiin waxaa mar walba wanaagsan inaad dhigtid meel laga heli karo markaad geeriyootid ka dib. Waa inaad dhigtid meel amaan ah. Waxaad u dhiibi kartaa qofka aad wakiilatay maadaama qofkani yahay qof aad aamintay oo aad hubtid inuu dardaarankaaga siduu yahay u fulinayo. Ugu yaraan qofka wakiilka aad ka dhigatay waa inuu ogyahay meesha dardaaranka laga heli karo. Hadii aad dhigtay qasnadda guriga kuu taala ama sanduuqaaga bangiga gaysay waa inaad hubisid inay kala soo bixi karaan.



Gobolka Minnesota, maxkamadaha dhaxalka ama xafiisyadda maamulka maxkamadaha ayaa dadka dardaaranka u hayo iyagoon wax lacag ah ka qaadaynin ama khidmad yar ka qaadanaya. Xaq baad u leedahay inaad wakhti kasto oo aad doonaysid aad la soo noqtid dardaarankaaga.

Hadii qareen kaa caawiyay qoritaanka dardaarankaaga, waxaa laga yaabaa inay kuu soo bandhigaan inay kuu hayaan dardaaranka. Marka hadii qareenku kuu hayo waa in qoyskaaga iyo qofka wakiilka kuu ahiba ay ogyihiin in qareenku dardaarankaagii hayo.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuql kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.